

# Jadwalka Taariikhda Sanad-dugsiyeedka 2018-19 waa la soo

## saaray

Guddida Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland, kulankoodii ay qabsadeen habeenimadii Tallaadadii waxa ay ku ansixyeen jadwalka taariikhda sanad-dugsiyeedka 2018-19. Nuqul qabyo-qoraal ah oo Jadwal taariikheedka waxaa lagu soo bandhigay shabakada dugsiyada degmada si ay dadweynuhu u akhristaan, waxaana ka muuqda waxoogaa isbedelo lagu sameeyey laga soo bilaabo 2017-18.

Dugsiyada degmadu waxa ay meesha ka saareen iskuuladii hore loo fasaxi jiray iyo kuwii furitaankooda dib loo dhigi jiray, isbedelkani wuxuu la kowsaday heshiiska qandaraaska cusub ee dugsiyada degmadu la galeen Ururka Macallimiinta Portland bishii Febraayo, isbedelkaasi bisha Noofembar ee jadwalku wuxuu keenayaa in ardaydu helaan waqtiga xilliga dayrta todobaadka fasax ah ee Thanksgiving lagu jiro. Labadii maalmood ee shirarka waalidiinta ee macalimiinta ay la kulmi jireen ee la qabtay bishii Noofembar 8deedii iyo 9keedii sanadkii 2017 waxaa loo bedelay iyagana oo la qaban doonaa maalmaha Isniinta iyo Tallaadada ee bisha Noofembar 19keeda iyo 20keeda sanadka 2018.

Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Xafiisyada Dugsiyada Degmada waxaa la xiri doonaa maalinta Arbacada, bisha Noofembar tahay 21keeda, iyada oo la isku dari doono maalmaha ciida dhaqanka ee Thanksgiving iyo maalinta ka dambeysa oo ay yihiin maalmo fasax ah- taasi oo keeneysa in ardaydu helaan todobaad fasax ah xilliga dayrta ah.

“Shaqaaluhu waxa ay nala wadaageen warcelintii dad fara badan oo ay arrintani khayso kuwaasi oo tallada ay ku soo biiriyeen aad loo tixgaliyey run ahaanii sameynta jadwalka taariikhda ee cusub,” sidaas waxaa tiri Julie Esparza Brown oo ah xubin Golaha Waxbarashada, ahna Madaxa Golaha ee Guddida Barista iyo Barashada oo ay si qoto dheer u falanqeeeyey jadwalka taariikhda ka dib markii Guddoomiyaha

Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland Guadalupe Guerrero ansixiyey nuqulka qabyo-qoraalka kama dambeysta ah.

Waxaa kale oo jira isbedel muhiim ah oo raad ku yeelayano Maalinta Madaxweynaha, dhaqan ahaan maalintaasi waa ay xiran yihiin iskuulada iyo xarunta dhexe ee Dugsiyada Dadweynaha Portland. Haddaba si kasta arrintu ha ahaatee, bishii Febraayo 18keedi waxaa loo qoondeeyey inay ay ahaato maalin lagu kabayo maalmihii barafku dhacay ee iskuulkku xirnaa jawigaa cimiladuna uu xumaaday. Dugsiyada Degmada waxaa looga baahan yahay inay ay ku dhawaaqaan Janaayo 18keeda haddii ay u isticmaali doonaa Febraayo 18keeda maalin lagu kabayo ama haddii ay noqon doonto maalin fasax ah.

“Waxaa filayaa inay muhiim ah in la ogaado in jadwalka taariikhdu uu ka turjumayo qorsheyn fiican,” sidaas waxaa tiri Julia Brim-Edwards, Guddoonka Golaha. “ Sanadihii hore ee aan soo dhaafnay ma dhici jirin in aan sii qorsheyno maalmaha barafka, iyada oo aan filayo in aan iminka si wanaagsan u sii qorsheynay sanadka soo socda marka laga yimaado inuu sanadka soo socdaa noqon doono sidii kii aan soo dhaafnay ama sanad la mid ah kani oo kale. Tani waxa ay qoysaskeena siineysaa xaqiiqdii wax ay ku talogalaan.”

Halkan ka fiiri [jadwalka taariikhda oo dhammeystiran sanad-dugsiyeedka 2018-19 PPS](#).